



Forbud mot tvangsekteskap (somalí)

Mamnuucidda guurka khasabka ah

Dhammaan magangelyadoonayaasha ka yimaada dalalka uu guurka khasabka ahi ka jiro, waa in la siiyaa warbixin la xiriirta mamnuucida sharciga norwiiijigu uu mamnuucayo guurka khasabka ah.

Haddii uu qofi guursado isaga oo aan guurkaas doonayn, kaddib markii loo geystay cadaadis, hanjabaad ama dagaal xag maskaxiyan ah ama mid jireed ah, ayaa waxaa loo yaqaan guur khasab ah.

Norway waa ka mamnuuc in qof lagu khasbo in uu guursado

Waa mamnuuc in qof lagu khasbo in uu guursado ama taas cadaadis lagu saaro. Guurka khasabka ahi waa xadgudub weyn oo lagu xadgudbayo xaquuq bani'aadam oo aasaasi ah.

Guurku waa in uu ahaadaa mid xor laysu guursanayo. Taas oo micnaheedu yahay in loo baahan yahay in qof walba uu isagu go'aansado in uu guursanayo, qofka uu guursanayo iyo goorta uu guursanayo intaba.

Qofka ku khasba qof kale in uu guursado ama ka qaybqaata guur khasab ah, wuxuu khatar ugu jiraa ciqaab xabsi oo gaaraysa ilaa iyo lix sano. Tani waxay dhacaysaa xataa haddii uu guurku ka dhaco dalka dibeddiisa. Dadka arrintan lagu helo oo lagu xukumo waxaa sidoo kale dhici karta in Norway laga tarxiilo.

Ka qaybqaadasho guur khasab ah waxaa tusaale ahaan loo arkaa in warbixinno khalad ah si kas ah loo siiyo mas'uuliyiinta ama qofka guursanaya laftigiisa, iyada oo ujeeddadu tahay in uu guurka khasabka ahi meel maro.

Norway qof kasta oo ka yar 18 sano waa carruur (ilmo aan qaangaarin), qofkuna waa in uu 18 sano gaaraa si uu u guursado. Denbi lagu ciqaabo ayuu noqon karaa in loo galmoodo ilmo ay da'doodu ka yar tahay 16 sano.

Guurka khasabka ah iyo guurka dibedda ka dhacay ee la guursaday qof aan qaangaarin, caadiyan Norway kaa siin maayaan xaqa qoys-isu-keenidda ee qofka aad is qabtaan.

Waa lagu caawin karaa haddii guur khasab ah lagu guuriyey

Mas'uuliyiinta norwiiijigu way caawinayaan dadka guurka khasabka ah loo guuriyey ama ka baqaya in guur khasab ah loo guuriyo. Waxay mas'uuliyiintu ku siin karaan hoy ammaan ah, hagiis iyo qareen kaa caawiya sidi aad arrinta u dacweyn lahayd guurkana u baabbi'in lahayd.

Haddii aad u baahan tahay warbixin intan ka badan oo ku saabsan mamnuucidda sharciga ama meesha aad caawin ka heli kartid, waxaad la hadli kartaa shaqaalaha Waaxda agaasinka ajnebiga (UDI) ama kuwa xerada qaxootiga. Waxaad sidoo kale la hadli kartaa dhakhtar ama kalkaaliso caafimaad (helsesøster).

Ma fahantay warbixinta?



Forbud mot tvangsekteskap (somalí) Mamnuucidda guurka khasabka ah

Informasjonsskriv / Qoraal warbixin ah

[UDI 2014-041](#), www.udiregelverk.no

Have you understood the information?

Jeg har forstått informasjonen / Waan fahmay warbixinta

Søkerens navn og DUF-nummer / Magaca iyo lambarka DUF ee codsadaha
--

Sted og dato / Goog iyo taariikh

Underskriften til søkeren ¹ / sixiixa codsadaha ²

Jeg bekrefter å ha gitt informasjon / Waxaan caddaynayaa in aan ku wargeliyey

Underskriften til medarbeideren/saksbehandleren / sixiixa shaqaalaha/kiis-hayaha
--

Eventuelle merknader / wixii faallo ah
--

1 Asylsøkere under 18 år skal ikke undertegne informasjonsskrivet, men bekrefte muntlig om informasjonen er forstått.

2 Magangelyadoonayaasha ka yar 18 sano ma saxiixayaan qoraalka warbixinta ah, laakiin afka ayay ka xaqiijinayaan in ay warbixinta fahmeen.

Forbud mot tvangsekteskap

Alle asylsøkere som kommer fra land der det forekommer tvangsekteskap, skal motta informasjon om det norske lovforbudet mot tvangsekteskap.

Hvis noen blir gift mot sin vilje, etter å ha blitt utsatt for press, trusler eller annen psykisk eller fysisk vold, kalles det et tvangsekteskap.

I Norge er det forbudt å tvinge noen til å gifte seg

Det er forbudt å tvinge eller presse noen til å gifte seg. Tvangsekteskap er en alvorlig krenkelse av grunnleggende menneskerettigheter.

Et ekteskap skal inngås av egen fri vilje. Det betyr at enhver skal bestemme selv *om* hun eller han vil gifte seg, med *hvem* og *når*.

Den som tvinger noen til å gifte seg eller medvirker til tvangsekteskap, risikerer fengselsstraff i inntil seks år. Dette gjelder selv om ekteskapet inngås i utlandet. Personer som blir dømt for dette kan også bli utvist fra Norge.

Som medvirkning til tvangsekteskap regnes blant annet bevisst å gi uriktige opplysninger til myndighetene eller til personen som skal inngå ekteskap, hvis hensikten er å gjennomføre et tvangsekteskap.

I Norge er alle under 18 år barn (mindreårig), og du må være 18 år for å gifte deg. Det kan være straffbart å ha seksuell omgang med barn som er under 16 år.

Tvangsekteskap og ekteskap som er inngått i utlandet med en som er mindreårig, vil normalt ikke gi rett til å få familiegjenforening som ektefelle i Norge.

Du kan få hjelp om du er utsatt for tvangsekteskap

Norske myndigheter skal hjelpe personer som har blitt eller frykter å bli utsatt for tvangsekteskap. Myndighetene kan gi trygg bolig, veiledning og hjelp fra advokat til å anmelde forholdet og få ekteskapet kjent ugyldig.

Hvis du trenger mer informasjon om lovforbudet eller hvor du kan få hjelp, kan du snakke med ansatte i UDI eller på asylmottaket. Du kan også snakke med en lege eller en helsesøster.

Har du forstått informasjonen?